



GURI DAB KA GAASHAAMAN



Talo fiican ku saabsan sidad adiga iyo ●
qoyskaagu isaga badbaadin lahaydeen dab ●



Dabka guryaha Norwijanka

Sannad walba ku dhawaad 60 qof ayaa ku dhinta dab Norway – badankooda guryahooda gudahooda. Waaxda dabka waxa loogu wacaa 1,600 dabab guri, shirkadaha caymiskana waxay helaan 25,000 sheegasho ka badan ku saabsan dab ama wax dab u dhow. Dababkan badankoodu waxa sabab u ah taxaddar la'aan, digtoonaa la'aan iyo aqoon la'aan.



Waajibka qiiq dareemaha

Guri walba waxa waajib ah sharci ahaan in la geliyo ugu yaraan hal qiiq dareeme. Guriyahay leh dabaq ka badan, waxa lagu taliyanayaa in ugu yaraan hal qiiq dareeme la geliyo dabaq walba. Qiiq dareemeyaashu waxay ku siinayaan digniin hore in dab kacayo. Tani waxay ku siinaysaa waqti aad ku badbaadiso naftaada iyo dadka kale oo guriga jooga, waxay kaloo ku siin kartaa waqti ku filan inaad dabka damiso. Qiiq dareemeyaal waxa lagu dhejin saqafka halka ugu shisheysa kana fog ugu yaraan 50cm darbiga. Qiiq dareeme waa in la tijaabiyaa ugu yaraan mar bishii iyo markasta oo aad maqantay muddo ka badan. Batteriga waa in sida caadiga la beddelaa sannadkii mar.



Waajibka qalabka dab daminta

Dhammaan guriyahay waa inay lahaadaan tuubada biyaha loogu talagalay dabka iyo dab damiye. Waxa lagu talinayaa in labadaba la haysto. Qalabka daminta waa in lagu dhejiyaa meel si sahlan looga heli karo markay xaalad degdeg ah dhacdo. Si taxaddar leh u aqri tusmooyinka. Waa muhiim in la dayactiro loona kormeero si joogta ah qalabka dab daminta. Hubi in halka biyaha laga furo shaqeyneyso iyo in tuubadu ayan lahayn dillaac. Dab damiyeyaasha gacanta lagu qabto waxa la kormeera iyadoo la hubanayo intilmaamaha cabbirka cadaadiska uu tilmaamayo meesha cagaaran. Foorari damiyaha si aan budadu isu qabsan. Haddaad ka hesho cillad ama waxyeello qalabkaaga daminta, waxad ka ila xiriirtaa badeeco iibiyaha wixi ku saabsan hagaajin ama beddelaad.

Waddada cararidda

Haddii dab kaco, waxa muhiim ah in qof walba oo guriga jooga si dhaqso leh u carari karo. Sidaa darteed waa inaad kala hadashaa qoyskaaga waxa lagu dhaqaaqayo haddii dab kaco aadna go'aamisaan waddada cararidda ugu wanaagsan qol walba. Ku heshiia meel aad ku wada kulantaan guriga dibeddiisa. Waddada cararidda ha laga dhigo firaaqo, siiba dhismooyinka dabaqyada ah oo qayb walba dad badan deggen yahay. Hubi inay fududahay furidda dariishadaha iyo albaabada, kana fiirso haddii cawinaad dheeraad, sida jaranjaro lagu baxsado iwm loo baahan yahay.



Sida loo dhaqmayo xilliga dabka

- 1) QIIMEE: Waa inaad go'aamisaa tallaabooyinka sida loo kala hor qaadayo adoo ku saleynayo qiimeyntaada ee xaaladda.
- 2) BADBAADI: Hubi inaad u digto qof kasta oo jooga guriga . Is caawina si aad ku tagtaan halkii lagu talagalay in lagu kulmo.
- 3) U DIG: Ogeysii waaxda dabka adoo wacayo 110. U sheeg macagaaga siina cinwaanka saxa ee dhismaha gubanaya.
- 4) DAMI: Haddii dabku usan aad u faafin, isku day inaad damiso. Ha is galinin khatar weyn. Ha illoobin in qiiqun sun yahay.
- 5) LA-TALI: La kulan ka lana tali waaxda dabka xaaladda marka ay yimaaddaan. Isla markiiba ogeysii hadduu jiro qof aan ka soo bixin. Ha gelin dhismaha si aad u badbaadiso xayawaan ama alaab shakhsiyeed . U dhaaf hawshaas waaxda dabka.



Ka taxaddar dabka ololaya


- Marna ha uga tegin qol shumac daaran. Marna ha dhigin shumac daran wax sahal u guban kara. Hubi in shumacyada la galiyo shumac haye aan liqliiqaneyn dabna qabsaneyn.
- Marna ha dhuuqin sagaar ama wax la mida adoo sariir ama sofa jiifa. Haddaad hurudo, sagaarka waxa ka kici karo dab qabsada sariirta ama alaabta guriga. Hubi inaad si habboon u faaruqiso sagaar damiye kasta. Haku tuurin dambas kulul dambiisha qashinka.
- Haddaad qabto jiko fiican ama meesha lagu shido dabka guriga lagu kululeeyo, waa inaad isticmaashaa qoryo qallalan leedahana dabeyl ku filan . Dab xoog leh aan lahayn dabeyl ku filanwaxa ka kici kara dab qabsada meesha qiiqu ka baxo. Ha illoobin inaad meesha dabka hor dhigto wax idinka xijaaba.

Iska badbaadi dab laguugula qasaday

Marna ma iska badbaadin kartis 100% dab laguugu talagalay, laakiin waxa jira tallaabooyin qaar u muuqday kuwa waxtar leh.

- Dabyow badan oo qasdi ah waxa lagu billaabaa alaab dab qabsi leh oo si taxaddar la'aan meel loogu keydiyay ama la xoorey. Alaabooyinkaas waxa ka mid noqon karo alaab dhismo, kartoono ama qashin. Sidaa darteed waa inaad xaqiijisaa in jaranjarooyinka, garaashyada iyo darbiyada bannaanka in ayan oollin alaab dab qabsi leh oo dhirigelin kara qof dab qabadsiiye ah.
- Ka fogoow inaad dhigto weelasha qashinka darbiga bannaanka ee dhismaha. Weelka an qufullayn ha ka foogaado dhismaha ugu yaraan 10 miter.
- Guryo badaan oo iskaashatooyin waxay leeyihiin hab intercom lagu xukumo soo gelida dhismaha. Ha u oggolaanin qof aan ruqso u lahayn inuu soo galo.






U isticmaalid qalab koronto si saxa

- Jiko: Markasta isha ku hay jikada marka ay shidantahay. Ka fogow isticmaal kul aad u daran. Haddii taleefon lagaa waco, tusaale ahaan, wa inaad dababka demisaa. Marna ha ka tegin guriga adoon hubin in dabka jikadu dansan yahay.
- Dhuunta Qiiqa: Hubi inaad sifeyso dhuunta qiiqa ee jikada korkeeda ugu yaraan laba jeer sannadkii. Waxa ku uruura dufan badan, dufankaas dab baa qabsan kara haddii kulka jikadu xoog leeyahay.
- Qasaaladaha iyo qallajiyayaasha: Mar kasta oo aad guriga ka tegeyso demi qasaladdaada, saxamo dhaqaha iyo qallajiyahaaga. Marna yuusan shaqeynin qalabkaas adoo hurda. Nadiifi marada daboolka ah ee qallajiyahaaga isticmaal ka dib.
- TV: Markasta ka demi TV-gaaga badhanka dar/demi markaad guriga ka tegeyso iyo inta adan seexan. Kuma filna in la isticmaal remootka .
- Qalab kale ee koronto: Waa inaad ka saartaa korontada qalabka leh kul xukunka (mashiinka qaxwaha , biyo kululeeyaha, birta dharka , timo qallajiyaha, iwm) marka aan la isticmaaleyn. Waa fikrad fiican in la isticmaalayo qalab waqti go'an ka dib si automaatik ah u joojinayo korontada.

Ula dhaqan si ixtiraam leh xarkaha korontada

Guri-mulkiileyaashu waxay mas'uul ka yihiin in qaabka xarkaha guryahoodu habboon yahay. Haddii godadka korontada, breesooyinka, xarkaha ama fiyuusyada aad u kululaadaan ama ay ka muqato caalamad gubasho, waa inaad u wacdaa mas'uuliyiinta korontada deegaanka ama koronto-yaqaan ruqsa leh sida ugu dhaqsi badan. Ha siku dayin inaad adigu hagaajiso. Hagaajin ' hiddaayad koronto u leh' h waa sharci darro waana khatar.



Liiska- xaqiijinta

	OK waaye	OK Ma'aha
1. Qiiq dareemaha si saxa ayaa loogu dhajiyay wuxuuna u shaqeeyaa sidii loogu talagalay.		
2. Qalabka dab daminta guriga oo lagama maarmaanka ah waa yaallaa qof walbana waa ogyahay halka uu yaallo.		
3. Waddooyinka cararidda waa firaaqo qoyskaaguna wuu ku heshiiyay halka uu ku kulmayo guriga dibaddiisa.		
4. Qofwalba uu ogyahay waxa u ku dhaqaaqayo haddii dab kaco qofwalbana wuu ogyahay lambarka waaxda dabka (110).		
5. Shumacyada daaran waxa lagu ridaa shumac haye aan liqliiqaney dabkuna usan qabsaneyn isha ayaana lagu hayaa.		
6. Jaranjarooyinka , garaashyada iyo darbiyadda bannaanka waa kay firaaqo alaab walba oo dab qabsan kara oo dhiiri galin karto qof dab-qabadsiiye ah.		
7. Jikada inta la isticmaalayo isha ayaa lagu hayaa dhuunta qiiqana si joogta ah ayaa loo nadiifiyaa.		
8. Qasaaladda iyo qallajiyaha waa inan la isticmaalin kolka la hurdo ama marka aan cidna guriga joogin oon la ilaalineyn.		
9. Telefshinka waxa markasta laga demiyaa badhanka ah dar/demi – lagama demiyoo remootka kaliya.		
10. Hagaajin kasta ama beddelid xarkaha korontada waxa sameeya koronto yaqaan ruqso u qaba.		



Norsk brannvernforening

Stiftelsen Norsk brannvernforening
Postboks 6703 St. Olavs plass, 0130 Oslo
Internett: www.brannvernforeningen.no

Denne brosjyren finnes på flere vanlige minoritetsspråk, og kan bestilles eller lastes ned fra www.brannvernforeningen.no.
Brosjyren er utviklet med støtte fra Utlendingsdirektoratet og Direktoratet for samfunnssikkerhet og beredskap.